

Hydrokortison Trimb

Lagu daaweeyo cambaarta sahlan, qaniinyada cayayaanka iyo ololka qorraxda

Boomaatada Hydrokortison Trimb waa labeen/boomaato khafiif ah oo leh hormoonada cortisone oo loo isticmaali karo dhibaatooyin harag oo kaladuwan, gaar ahaan noocyo kaladuwan oo ah cambaar iyo cuncun. Sidaas darteed waa wax fiican in lagu daro kaydka daawooyinka gurigaaga.

Cambaartu waa ereyga wadajir loogu tilmaamo barrada ama olollada haragga sare ee caadi ahaan waqti dheer oo aanan faafin. Caadi ahaan waxaa la isku arkaa calaamadaha midkood ama in ka badan sida casaanka, kuusyada, boogaha yar yar ee biyo leh, haragga adag iyo diirmista. Cambaartu waxay yeelan kartaa sababo farabadan sida arrimo dhaxal ah iyo walxo taabta haragga, sida macdanta nikal iyo saabuunta dharka, taasoo loo yaqaanno cambaarta taabashada. Daawaynta cambaarta waxay ujeeddadeedu tahay in la yareeyo bararka ama ololka haragga iyo in la daaweeyo dahaarka sare ee haragga ee xumaaday ama daciifay. Daawooyinka ugu muhiimsan waa hormoonada cortisone iyo jilciyayaasha haragga la mariyo.

Celisa ololka oo yaraysa bararka iyo casaanka

Boomaatada Hydrokortison Trimb waa daawo celisa bararka ama ololka iyo cuncunka oo riijeeto la'aan lagu iibsado waxayna aad ugu fiican daawaynta noocyo kaladuwan oo ah cambaarta sahlan, iyo weliba qaniinyada cayayaanka iyo ololka qorraxda.



XANUUN



OLOL



CUNCUN

Sida loo isticmaalo boomaatada Hydrokortison

Subax kaste iyo habeen kaste marso qayb khafiif ah ama sida uu takhtarkaagu kuugu tilmaamo. Ka dib 3-4 maalmood waxaa caadi ahaan la yarayn karaa inta jeer ee la marsado boomaatada Hydrokortison Trimb waxaana daawaynta lagu bedbeddeli karaa boomaato ama labeen haragga jilcisa. Haddii ay calamaadaha cudur roonaan waayaan hal toddobaad ka dib, la xiriiir takhtarkaaga si aad talo uga hesho. Buugyarahan si taxaddar leh u akhri.

Celisa bararka ama ololka iyo cuncunka



Labenta iyo boomaatada Hydrokortison Trimb ee 1% waa daawo riijeeto la'aan lagu iibsado oo laga iibsan karo farmashiidaada. Carruurta 2 jir ka yar waa in lagu daaweeyo oo keliya marka uu takhtarkaagu ku taliyo. Ka ilaali taabashada indhaha
Xiriirka: Trimb Healthcare, Östermalmsgatan 19, 114 26 Stockholm,
+46 (0)8 - 12 13 52 00, info@trimb.se